# AKHBAARAAD CUSUB OO KU SAABSAN JADEECADA

*Laga bilaabo Maarso 20, 2025*

- Jadeecadu waa cudur ay dadku aad isku qaadsiiyaan waxaana keeno fayras.
- Jadeecada ayaa si fudud u fida marka qof jadeeco qaba uu neefsado, qufaco, ama hindhiso. Waxa kale oo ay ku fidi kartaa haddii dadku taabto sagxadaha ama alaabaha uu dulsaaran yahay fayraska.
- Jadeecada waxay sababi kartaa cudur daran iyo dhimasho.
- Jadeecada ayaa ka istaagtay inay ku fido Maraykanka 2000 maadaama tallaalku aad uu waxtar u leeyahay. Intii lagu jiray cudurka safmarka ahaa ee COVID-19, dad badan ayaa la tallaali waayay, taasoo keentay kiisas badan oo jadeeco ah lagu arko adduunka oo dhan. Si aad uga fogaato jadeecada, ugu yaraan 95% dadka ayaa u baahan in la tallaalo.
- **Hadda, waxaa jira jadeeco ka dillaacday Texas iyo New Mexico. Laga bilaabo Maarso 13, 2025, 301 qof ayay saameysay. 50 qof ayaa loo dhigay isbitaalka, ugu yaraan hal cunug oo ah ardayda gaadhay da'da dugsiga oo aan la tallaalin ayaa dhintay.**

**Yay tahay cida ay ku dhici karto jadeecada?**

- Qof kasta, laakiin wuxuu ku badan yahay carruurta iyo dadka aan qabin tallaalka.

**Sideen ku ogaan karaa in aniga ama ilmahaygu aan qabno jadeeco?**

- Caabuqa jadeecada wuxuu dhici karaa 10-14 maalmood ka dib markaad si toos ah ama si aan toos ahayn ula falgasho qof kale oo jadeeco qaba.
- Astaamaha ugu horreeya ee jadeecada inta badan waa qandho daran, qufac, diif, iyo indhaha oo qofka noqdo casaan. Intaas ka dib, dadku waxa laga yaabaa inay afkooda ku arkaan nabaro cadcad iyo finan ka soo bilaabma wejiga oo ku fida jidhka.
- Ugu yaraan 1 ka mid ah 5-tii qof ee aan la tallaalin ee ay ku dhacdo jadeecada ayaa aad u xanuunsan doona oo u baahan doona inay aadaan isbitaalka.
- Saamaynta halista ah ee jadeecada waxaa ka mid ah fuuq-bax, indho beel, dhaawac soo gaara maskaxda ah, iyo oof-wareen.
- Jadeecada xilliga uurka waxay halis ku noqon kartaa qofka uurka leh iyo ilmahooda caloosha ku jira.
- **Haddii aad u malaynayso in xubin qoyska ka tirsan uu qabo jadeeco fadlan wac dhakhtarka isla markaaba.**

**Sideen ku ilaalin karaa caafimaadka naftayda iyo tan qoyskayga?**

- Tallaalka jadeecada, oo inta badan lala qaato tallaalada qaamo-qashiirta iyo rubella (MMR), ayaa qiyaastii 97% si waxtar leh uga hortagto jadeecada. Waxaa jira 2 qiyaasood. Mid waxaa lagu qaataa da'da 12-15 bilood midka kalana waxaa lagu qaataa da'da afar ilaa lix sano. Carruurta u safraysa meel ka baxsan Maraykanka waa inay qaataan qiyaasaha tallaal hore, ugu horreyn lix bilood.

# AKHBAARAAD CUSUB OO KU SAABSAN JADEECADA

*Laga bilaabo Maarso 20, 2025*

**Ilmahaygu waxa uu ka weyn yahay 6 sano welina muusan qaadanin tallaalka MMR - weli may qaadan karaan hadda?**

- Haa Marna uma noqoto in laga daahay carruurta ama dadka waaweyn inay qaataan tallaalka jadeecada.

**Waa maxay dhibaatooyinka lagala kulma tallaalka MMR?**

- Dhibaatooyinka caadiyan ugu badan ee ka dhasha tallaalka MMR waa cudud xanuun, qandho, iyo finan. Waxaa jira waxyeelooyin kale oo aan inta badan la isku arkin, sida in xanuun si ku meel gaar ah laga dareemo kalagoysyada ama falcelinta xasaasiyadda.
- Fadlan la hadal dhakhtarkaaga haddii aad wax su'aalo ah ka qabto dhibaatooyinka laga dhaxlo talaalka.

**Tallaaladu ma yihiin kuwo badqab leh? Tallaalku ma keenaa xanuunka ootisimka?**

- Tallaal kastaa wuxuu leeyahay qaar waxyeelo ah (kor ka fiiri). Waxyeelooyinka ka dhasha talaalka waa kuwo fudud oo aad uga ammaan badan in lagugu tallaalo jadeecada.
- Tallaalka MMR ma keeno ootisim. Waxaa jirtay cilmi-baadhis la sameeyay 1998-dii oo si khalad ah ugu xidhay tallaalka ootisim, laakiin markii dambe laga saaray joornaalka caafimaadka ee loogu daabacay inay tahay khiyaano.
- Dad badan ayaa weli aaminsan in tallaalka MMR uu keeno ootisim.
- Calaamadaha ootisimku waxay badanaa ka bilowdaan da'da marka carruurtu qaataan tallaalka MMR, taas oo keeni karta jahawareer. Daraasado dhowr ah ayaa xaqiijiyay inuusan jirin xiriir ka dhexeeya tallaalka MMR iyo ootisimka. Xarumaha Lagu Xakameeyo Cudurrada (CDC) iyo Akademiyada Maraykanka ee Dhakhaatiirta Carruurta (AAP) ayaa labaduba xaqiijiyay in tallaalka MMR uusan mas'uul ka ahayn kororka tirada carruurta qaba ootisimka ee dhawaan lala kulmay.
- Waxaan ku talinaynaa in la qaato talineynaa tallaalka MMR maadaama ay tahay mid nabdoon.

**Faytamiin A ma ka hortagi karaa jadeecada?**

- Fitamiin A waxaa mararka qaarkood loo isticmaalaa daawaynta qofka ay horey ugu dhacday jadeecada. Si kastaba ha ahaatee, cunista cunto uu ku badan yahay fitamiin A ama qaadashada kaabyada fitamiin A kama hortagi karto jadeecada. Dhab ahaantii, cunista ama cabbitaanka badan ee fitamiin A waxay dhaawac u keeni kartaa beerka, qofka wuu miyir beeli karaa, cilado ku dhaca ilmaha dhalanaya, iyo dhibaatooyin kale oo caafimaad. La hadal dhakhtarkaaga ka hor intaadan qaadanin kaabista fiitamiinada ama aadan siinin kaabista fitamiinada carruurta. Sida ugu wanaagsan ee looga hortagi karo jadeecada waa in la hubiyo in dhammaan xubnaha qoyskaaga la siiyay tallaalka MMR.

**Tixraacyada:**

- Websaydka Jadeecada ee Boston Public Health Commission (boston.gov/measles)
- World Health Organization (WHO) Measles webpage
- Jadeecada ka DilaacdayTexas Department of State Health Services – Febraayo 28, 2025 | Texas DSHS
- CDC Measles, Mumps, Rubella (MMR) Vaccine Safety | Vaccine Safety | CDC
- Tallaalada iyo Ootisimka | Children's Hospital of Philadelphia
- History of Measles | Measles (Rubeola) | CDC
- Horumarka Laga gaaray Ciribtirka Jadeecada — Worldwide, 2000–2022 | MMWR